IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 18ka Jannaayo 1988, L. 1 R 1

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya guudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. haikii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 2 ee 29 Dis. 1987, Oggolaansho Miisaaniyadda ku talo galka Dawladda ee Sannadka 1988. Bog 35

SHARCI L. 3 ee 19 Dis. 1987, Oggolaanshaha Qorshaha Qaranka ee Shanta S a n o 1987-1991 » 36

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 21 Dis. 1987, Magacaabidda Xubnaha Golaha WASIIRADDA » 37

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 2 ee 16 Dis. 1987, Magacaabid » 41

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 29.1.86, Naado Dhul J.le Xabiibo Axmed Cilmi L. 26 » 43

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 4.3.86, Naado Dhul J.le Axmed Maxamed Cali L. 27 » 44

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 2.11.86, Naado Dhul J.le Xuseen Cusmaan Maxamed L. 28 » 45

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 13.12.86, Naado Dhul J.le Maryan Mire Aadan L. 29 » 46

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 16.12.86, Naado Dhul J.le Caasha Cali Cawaale L. 30 » 47

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.2.86, Naado Dhul J.le Axmed Xaaji Xaashi L. 31 » 48

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.2.86, Naado Dhul J.le Axmed Xaaji Xaashi L. 32 » 49

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.2.86, Naado Dhul J.le Yuusuf Cusmaan Culusow L. 33 » 50

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.2.86, Naado Dhul J.le Axmed Nuur Aadan L. 34 » 51

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.2.86, Naado Dhul J.le Xaaji Macaani Sheekh L. 35 » 52

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0557421 ku qoran Weris Cali Cusmaan L. 36

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0010085 ku qoran Weris Cali Cusmaan L. 37 » 55

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0455954 ku qoran Weris Cali

Cusmaan L. 38 » 54

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0951539 ku qoran Weris Cali Cusmaan L. 39 » 56

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0145776 ku qoran Weris Cali Cusmaan L. 40 » 57

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0553555 ku qoran Cabdullaahi Nuur Ibraahim L. 41 » 58

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 7.12.87 Lumid Jeeg War. L. 0863564 ku qoran Jibriil Caamir L. 42 » 59

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 27.10.87 Lumid Jeeg War. L. 0907369 ku qoran Sadiiq Axmed Galiixo L. 43 » 60

MAXKAMADDA G. SH/DHEXE, 27.12.87. Lumid B/Kayd L. 2841 ku qoran Axmed Cabdi Xirsi L. 44 » 61

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.1.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Aadan Maxamuud Xuseen L. 45 » 62

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI Lambar 2 Tr. 29. Dis. 1987, Oggolaanshaha Miisaanjyadda ku_tala galka Dawladda ee Sannadka 1988.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyay in ay soo ururiso dakhliga iyo in ay bixiso kharajka ku qoran Miisaanjyadda halkaan ku lifaaqan iyadoo la raacayo xeerka, habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo tantida Dawlada.

Qodobka 2aad

1. Is bedelka guud ee Miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan Madaxyada Miisaanjyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharciga.

2. Kala wareejinta ku saabsan madax_xigeennada isku madax ah waxaa awood loo siiyay Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaad madax_xige waliba waxaa awood loo siiyay Wasiirka Wasaaxad walba kala wareejinta caynkan oo kale ee Miisaanjyadda D/Hoose waxaa awood loo siiyay Guddoomiyaha Horumarinta Gobol walba.

Qodobka 3aad

1. Miisaanjyadda loogu talo galay Mashruucyada Horumarineed iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loo isticmaali karaa oo keliya Mashruuc Horumarineed.

2. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay inuu keyd dhigo haddii loo baahdo dhammaan ama qeyb ka mid ah lacagta ku jirta madax_xige waliba ee Miisaanjyadda isagoo raacaya Sharciga.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jannaayo 1988, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI Lambar 3 Tr. 29 Dis. 1987, Oggolaanshaha Qorshaha Qaranka ee Shanta Sano 1977-1991.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Qorshaha Qaranka ee Shanta Sano 1987-1991, sida ku cad lifaaqa Sharcigan.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 3 ee 21 Dis. 1987, Magacaabidda Xubnaha Golaha Wasiirada:

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Faqradda 1aad, xarafka (B) iyo faqradda 2aad, ee Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Qodobka 86aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 iyo Sharciga lambar ee 22ka Luulyo 1987, kuna wada saabsan wax ka bedelidda Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la dhaqan geliyo go'aannadii 17ka Sebtember 1987 ee Kalfadhiga 2aad ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 iyo beddelaadyadii ka dambeeyay, kuna saabsan Njidaamka Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

J/layaasha soo socda waxaa loo magacaabay xilka mid walba magaciisa ku hor qoran:

1. Jaalle Maxamed Cali Samatar: Wasiirka Koowaad.
2. Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax: Ku Xigeenka Wasiirka Koowaad ee Arrimaha Dhaqaalaha.
3. Jaalle Axmed Suleymaan Cabdalla: Ku Xigeenka Wasiirka Kowaad ee Arrimaha Bulshada iyo Nabadgelyada.
4. Jaalle Axmed Maxamuud Faarax: Ku Xigeenka Wasiirka Koowaad ee Arrimaha Sivaadadda iyo Adeegga Guud.

WASIIRRADA MADAXTOOYADA:

5. Jaalle Cabdalla Maxamed Faadil.
6. Jaalle Maxamed Sheekh Cusmaan.
7. Jaalle Maxamed Geelle Yuusuf.
8. Jaalle Cabdi Warsame Isaaq.

9. Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen.
10. Jaalle Cabdiqaasim Salaad Xasan.
11. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame.
12. Jaalle Cabdullaahi Warsame Nuur.
13. Jaalle Maxamuud Saciid Maxamed.
14. J.le S/Gaas Aadan Cabdullaahi Nuur: Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.
15. J.le Sheekh Xasan Cabdullaahi Faarax: Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.
16. Jaalle Sheekh Maxamed Guuleed Xubin.
17. Jaalle Maxamed Cali Xaamud: Wasiiru Dawlaha Arrimaha Dibedda.
18. Jaalle Khaliif Muuse Samatar: Ku-xigeen.
19. Jaalle Maxamed Cabdulle Bacadle: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
20. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Maax: Ku-xigeen.
21. J.le Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta.
22. Jaalle Yuusuf Cali Nuur: Ku-xigeen.
23. Jaalle Axmed Haaruun Aadan: Ku-xigeen.
24. Jaalle Xuseen Cabdulle Calasow: Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga.
25. Jaalle Maxamed Nuur Caliyow: Ku-Xigeen.
26. Jaalle Mahad Dirir Guuleed: Ku-xigeen.
27. Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar: Wasiirka Wasaaradda Beeraha.
28. Jaalle Maxamuud Cabdi Nuur: Ku-xigeen.
29. Jaalle Cabdullaahi Maxamed Mire: Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Hiddaha.
30. Jaalle Yuusuf Cabdi Ibraahim (Kolombis): Ku-xigeen
31. Jaalle Suleymaan Maxamed Aadan: Ku-xigeen.
32. Jaalle Bile Rafle Guuleed: Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.
33. Jaalle Cali Saalax Cabdikariim: Ku-xigeen.
34. J.le Cabdirashiid Sheekh Axmed: Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta Dadweynaha iyo Dalxiiska.
35. Jaalle Yaasiin Xaaji Ismaaciil: Ku-xigeen.
36. J.le Maxamed Cabdi Yuusuf (Gaboos): Ku-xigeen.
37. J.le Axmed Xabiib Axmed: Wasiirka Wasaaradda Qor-

sheynta Qaranka iyo Horumarinta Dooxada Jubba.

36. J.le Yuusuf Cali Cusmaan: Wasiiru Dawlada Wasaaradda Qorsheynta Qaranka iyo Horumarinta D/Jubba.
39. Jaalle Maxamed Xaashi Cigaal: Ku_xigeen.
40. J.le Aadan Maxamed Cali: Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda, Dekedaha iyo Kalluumeysiga.
41. Jaalle Shire Suudi Maxamuud: Ku_xigeen.
42. Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Maxamed: Ku_xigeen.
43. J.le Cabdullaahi Maxamuud Xirsi (Ash Cari): Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyana.
44. Jaalle Nuura Shire Cabdulle: Ku_xigeen.
45. Jaalle Dr. Maxamed Cali Munasar: Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.
46. Jaalle Dr. Cabdullaahi Maxamed Siyaad: Ku_xigeen.
47. Jaalle Yuusuf Xasan Cilmi: Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.
48. Jaalle Cabdulfataax Maxamed Hiirad: Ku_xigeen.
49. Jaalle Muuse Rabile Good: Wasiirka Wasaaradda Hawlana Guud iyo Guriyeynta.
50. Jaalle Maxamed Cali Yuusuf: Ku_xigeen.
51. J.le Mire Awaare Jaamac: Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Isboortiga iyo Arrimaha Bulshada.
52. Jaalle Maxamed Yuusuf Axmed: Ku_xigeen.
53. Jaalle Jaamac Gaas Macaawiye: Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka.
54. Jaalle Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawari): Ku_xigeen

Qodobka 2aad

Ku Xigeennada Wasiirka Koowaad waxaa hoos imaanaya, kana mas'uul yihiin isuduwidda iyo kormeerka hawlgalka Wasaaradaha iyo hay'adaha ku hoos qoran:

1. Ku xigeenka Wasiirka Koowaad ee Arrimaha Dhaqaalaha:
   — Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta.
   — Wasaaradda Qorsheynta Qaranka iyo Horumarinta Dooxada Jubba.
   — Wasaaradda Gaadiidka Badda, Dekadaha iyo Kalluumeysiga.

— Wasaaradda Beeraha,
— Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.
— Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga iyo
— Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

2. Ku Xigeenka Wasiirka Koowaad ee Arrimaha Bulshada iyo Nabadgelyada.

— Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
— Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
— Wasaaradda Caafimaadka.

— Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.
— Wasaaradda Shaqada, Isboortiga iyo Arr. Bulshada.
— Taliyaha Ciidamada Booliska, Asluubta, Nabadsugida iyo Guulwadayaasha.

3. Ku Xigeenka Wasiirka 1aad ee Arrimaha Siyaasadda iyo AdeegaGuud.

— Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
— Wasaaradda Warfaanifta, Hanuuninta Dadweynaha iyo Dalxiiska.

— Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 2 ee 16 Dis. 1987:- Magacaabid.

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARRKAY: Qodobka 49aad ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 13aad, xubinnisa 1aad ee Sharci Lr. 6 ee 12.2.1980;

ISAGOO ARKAY: Go'aan Lr. GSHD/DC/07/87 ee 30.10.87 ee Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Ceynabo;

ISAGOO TIXGELIYEY:Warqad Lr. XMD/GS/172/87 ee 23.11.1987, oo ah talo soo jeedinta Guddoomiyaha Maamulka Dawladda Gobolka Sool.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

In J.le Suleymaan Warsame Guuleed oo ka mid ahaa Xubnaha Joogtada ah ee Golaha Shacbiga Degaanka Ceynabo loo magacaabay Guddoomiye Gole Shacbi ee Degaanka Deg. Caynabo, isagoo buuxinaya jagadii Guddoomiyihii hore Xasan Axmed Dhuunkaal oo Dalka ka baxsaday.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Adrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16.12.1987

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

(Jaalle Axmed Suleymaan Cabdalla)

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY. IYO WIXII LA MID AH

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AS

N A A D O D H U L

Waxaa ja caddeynayaa in J.le Xabiib Axmed Cilmi uu u soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maaljntii taariikhdu ahayd 8.2.80 uu ku soo weydiistay gabal dhul dawjadeed ah oo ku yaal Deg. Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Rettangojare Ad dimjhiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya Mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xjga: Dhul Lambar 216

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 117

B a r i waxaa ka xjga: Dhul Lambar 113

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkj karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana jaga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bijaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafjnta Rasmiga ah.

Muqdjsho, 4 Maarso 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D.HOOSE

(Dr. Xasan Maxamed Sabrjye)

L. 26

WAAXDA DHULKA RASMIGA AS

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O D H U L

Waxaa ja caddeynayaa in J.le Axmed Maxamed Cali uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D.Hoose ee Muqdisho, maaljntii taariikhdu ahayd 27.9.80 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Deg. Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Ad- djmihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhjya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xjga: Dhuj Lambar 44

Koonfur waxaa ka xiga: Jid

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 43

B a r i waxaa ka xiga: Dhuj Lambar 47

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkj karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana jaga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bijaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafjnta Rasmiga ah.-

Muqdjsho, 4 Maarso 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D.HOOSE

(Dr. Xasan Maxamed Sabrjye)

L. 27

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xuseen Cusmaan Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 5.5.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimjhiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 245 W.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lambar 262

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 2 Nov. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jaalle Aadan Xaashi Nuur)

L. 28

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maryan Mjre Aadan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdjsho, maalintii Tr. ahayd 17.7.80 uu ku wyediistay gabai dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. W/Afgooye Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimjhiisuna yihiin 70X80 kuna fadhiya 5.600 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid Dowladeed
Koonfur waxaa ka xiga: Xasan Xuseen Maxamed
Galbeed waxaa ka xiga: Xasan Xuseen Maxamed
B a r i waxaa ka xiga: Jid cad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdjsho, 3 Dec. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jaalle Aadan Xaashi Nuur)

L. 29

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Caasha Calj Cawaale uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho, maajintii Tr. ahayd 23.11.86 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Shibis Qaabkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 12X12 kuna tadhiya 144 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Dec. 1986
AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jaalle Xuseen Axmed Aadan)

L. 30

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.|e Axmed Xaaji Xaashi uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhu|ka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho, maalintii Tr. ahayd 15.1.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Deg. Kaa raan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addjmihiisuna yihiin 100X60 kuna fadhiya 6000 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhu|ka Axmed Nuur
Koonfur waxaa ka xiga: Goof dad
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Balcad
B a r i waxaa ka xiga: Goof dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar*k*i karaa Naqshadda dhu|ka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana |aga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10 Feb. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Dr. Xasan Maxamed Sabriye)

L. 31

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Axmed Xaaji Xaashi uu u soo qortay arji uma soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii tr. anayd 21.3.85 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees isl. Addimmiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Xaajiya Nuura
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Xeydar Cali

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muldo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10 Feb. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR

(Dr. Xasan Maxamed Sabriye)

L. 32

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Yuusuf Cusmaan Culusow uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga an ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 7.8.84 uu ku soo weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Afara Gees Isl. Addimihiisuna yihiin 100X100 kuna fadhiya 10.000 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muldo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10 Feb. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR

(Dr. Xasan Maxamed Sabriye)

L. 33

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Axmed Aadan Roobje uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho, maalintii Tr. ahayd 15.1.86 uu ku soo weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 190X100 kuna fadhiya 19.000 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Yaddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhulka Axmed X. Xaashi

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Balcad

B a r i waxaa ka xiga: Goof Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa **Naqshadda dhulka** oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muldo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Fuugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10 Feb. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR

(Dr. Xasan Maxamed Sabriye)

L. 34

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le X. Macaani Eheekh Abuukar uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho, maalintii Tr. ahayd 15.12.85 uu ku soo weydiistay gabal dowladeed ah oo ku yaal Deg. X/Jab Jab Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 13.80X10.40 kuna fadhiya 330,70 SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo Laami ah

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muldo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10 Feb. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR
(Dr. Xasan Maxamed Sabriye)

L. 35

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Weris Cali Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0557421 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 40.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Maxamed Deeq sida ku cad warqadda Lam. 064 Tr. 3.1.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0557421 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Maxamed Deeq.

WAXAA LA AMRAYAA

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Weris Cali Cusmaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 40.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 36

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Weris Cali Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 0010085 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Aadan Sheekh sida ku cad warqadda Lr. 064 Tr. 3.1.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xjs-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0010085 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Aadan Sheekh.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Weris Cali Cusmaan lacagta cadadeelu tahay Sh.So. 20.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood. laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 37

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Weris Cali Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 0455954 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Sheekh Maxamed Ibraahim Calj sida ku cad warqadda Lr. 064 Tr. 3.1.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In ja baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0455954 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Sheekh Maxamed Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Weris Cali Cusmaan lacagta cadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 38

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Weris Cali Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0951539 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cumar Maxamed Naaleeye sida ku cad warqadda Lr. 004 Tr. 3.1.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0951539 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cumar Maxamed Naaleeye.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Weris Cali Cusmaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelki Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L.39

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Weris Cali Cusmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0145776 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Xaawa Aadan Maxamed sida ku cad warqadda Lr. 064 Tr. 3.1.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0145776 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laantr Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Xaawa Aadan Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe in ay siiso J.le Weris Cali Cusmaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 40

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdul-laahi Nuur Ibraahim;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 0553555 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Nuur Ibraahim sida ku cad warqadda Lr. 122 Tr. 5.1.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa-liyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARRAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0553555 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Nuur Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа in ay siiso J.le Cabdullaahi Nuur Ibraahim lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 22.250 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii jnta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 41

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/44/87 Taariikhda 7.12.87

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Faadumo Cabdi Xuseen ee ku taariikhaysan 26.11.87 ayna ku codsanayso Jeegga Wareega ee lumay ee hoos ku qoran in loo cusboonaysiiyo, kuna qornaa Jibriil Caamir;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa qortay una kala diray laamaha Bangiyada iyo Xisaabaha Guud iyo Qaybta Sharciga, Taarkaasina ku taariikhaysan yahay 18.11.87;

MARKUU ARKAY: Xaashida lambarkeedu yahay 001165 ee 30.11.87 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa ayna ku soo caddeeyeen Jeeggaas ujeedada ku qoran meesha laga sameeyey cidda loo sameeyey taariikhda la sameeyey lacagta ku qoran iyo Laanta Bangiyada laga sameeyey, dhammaan waa sidaas ujeedada ku qoran;

MARKUU ARKAY: In lacagta Jeeggaas ku qoran ay iska leedahay Faadumo Cabdi Xuseen;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeeggaas Lambar yahay 0863564, lacagtiisuna tahay Sh.So. 100.000/=, loona cusboonaysiiyo Faadumo Cabdi Xuseen, cusboonaysiintana gacanta laga saaro gabadhaas ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib marka Digireetadan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ka dib.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad ee Hargeysa in uu go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii rabta ama dan ka leh Jeeggaas lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

K/S. Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

(Maxamed Yuusuf Caynaan)

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/36/87 Hargeysa, 27.10.87

UJ:- Degereeto cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 0907369 lacagtiisuna tahay 100.000/ ku qornaa Sadiiq Axmed Galiixo laga sameeyey Laanta 2aad ee Hargeysa, lana sameeyey 17.10.87;

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Sadiiq Axmed Galiixo ee ku taariikhaysan 24.10.87 ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee Ujeedada ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee ku taariikhaysan 24.10.87 ee uu Bangigu u kala diray laamiihiisa iyo Xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu iska leeyahay N. 423 ee 25.10.87;

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay Ninka la yiraa Sadiiq Axmed Galiixo;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee Ujeedada ku xusan la kansal gareeyo loona cusboonaysiiyo Ninka la yiraa Sadiiq Axmed Galiixo; cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata, muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa, si ciddiihaysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

MAXKAMADDA GOB. SH/DHEXE JOWHAR
QAYBTA MAAMULKA

TIRSI/MGJ 136/87

UJEEDDO: CUSBOONAYSIIN BUUG KEYD.

MARKUU ARKAY: Arjiga Dacwadda ah oo uu keensaday Jaalle Axmed Cabdi Xersi;

MARKUU ARKAY: Dacwaddu waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiinta Bangiga Ganacsiga Laanta Jowhar;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 No. Lumidda Buugga Lambar yahay 2841 kuna qoran tahay Lacag dhan Sh.So. 20.000 (Labaatan kun Shilin) kuna qoran yahay Axmed Cabdi Xersi.

WUXUU AMRAYAA

Wuxuu Amrayaa in loo cusboonaysiiyo B/Keydka kor ku xusan ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood markii Dekereetadan lagu sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda J.le Axmed Cabdi Xersi.

WAXAA LACODSANAYAA

In Buugga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga geliyo J.le Axmed Cabdi Xersi ama qof ka haysta Wakaalad sharci ah iyadoo la dhowrayo muddada 30ka maalmood ah.

Taariikh. 27.12.1987

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. SH/DHEXE
(Dr. Bashiir Raabi Faarax)

L. 44

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aadan Maxamuud Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg War. oo uu ku wada qoran yahay Aadan Maxamuud Xuseen, Lambarradooda, Laanta laga sameeyey iyo Lacagtooduba waa sidan hoos ku qoran:-

1) J/W. Lr. 0013993 Laanta 2aad Hargeysa Sh.So. 500.000/
2) J/W. Lr. 0277222 Laanta Kismaayo » » 100.000/
3) J/W. Lr. 0277223 » » » » 100.000/
4) J/W. Lr. 0277224 » » » » 100.000/

sida ku cad warqadda Lr. 000049 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku xusan lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 800.000/ kuna qoran magaca J.le Aadan Maxamuud Xuseen.

WAXAA LA FARAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku xusan in ay siiyaan J.le Aadan Maxamuud Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 800.000/ oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.1.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 45